NISA
FOUNDATION

# LIISKA HUBINTA QORSHAHA BADBAADADA

Inaad ka baxdo guriga waa adag tahay, liiskan hubinta waa isku day lagu hubinayo inaad badbaado leedahay inta lagu jiro wakhtigan. Kuwani waa talooyin fudud oo ah waxa aad hore u samayn karto si aad ugu diyaargarowdo haddii ay dhacdo inaad si degdeg ah uga baxdo xaalad rabshado ah.

## INTAADA TAGIN

- ☐ Haddii aad dhaawanto, u tag dhakhtar, cusbitaalka degdega ah ama rug caafimaad oo ka warbixi waxii kugu dhacay. Waydii inay siiyaan oo ay kuu sameeyaan dukumeenti booqashadaada.
- ☐ Hayso qorshe gurmad ah haddii lammaanahaagu uu ogaado waxaad qorsheynayso. Tusaale ahaan, xubin qoyska ama saaxiib ah oo ku qaadi kara ama aad si fudud ugu tagi karto iyaga.
- ☐ Ku xidh ama dhigo dhammaan aqoonsiga muhiimka ah ee naftaada iyo carruurtaada meel qarsoon:
  - Kaararka Social insurance
  - Kaararka bangiga iyo/ama lacagta degdegga oo aad gacanta ku haysato.
  - Shatiga/ warqada darawalnimada iyo kaararka caafimaadka. Qaybo warqad ah oo ay ku qoran yihiin magacaaga iyo magaca xadgudbaha, tusaale ahaan biilasha korontada/Laydhka
  - Canshuurta hantida, qoraalka bangiga, biilka telefoonka
- ☐ **Fadlan isku day inaad keento waxyaabaha soo socda:**
  - Diiwaangelinta iyo caymiska darawalka (haddii ay khuseyso)
  - Sawirka lamaanaha/lamaanaha
- ☐ Haddii ay nabdoon tahay,ama xaaladu kuu saamaxayso fadlan waxyaalaha soo socda ku hay meel qarsoon oo guriga ah. Haddii aanay ammaan ahayn ama aanay suurtogal ahayn in hadda lagu soo wado/kaxeeyo, ugu yaraan meel ku hayso way sahlanaan ama kuu fududaan doontaa in la helo mustaqbalka haddii ay suurtagal tahay:
  - Shandad degdeg ah oo leh waxyaabaha daruuriga ah.
  - Alaabta gaarka ah, raaxada carruurta ama caruurtu jecelyihiin.
  - Dahab.
  - Waxyaabaha qiimaha leh.
- ☐ Hubi in talefankaagu battariga/baytarigu kuu buuxo ka hor intaadan bixin oo qaado jaajeerkaaga.
- ☐ La hadal garyaqaan haddii ay suurtogal tahay haddii ay ammaan tahay, si aad ugala hadasho:

# LIISKA HUBINTA QORSHAHA BADBAADADA

- Heerka socdaalka haddii ay khuseyso (haddii aad ku jirto fiisaha tusaale ahaan)
- Sida ugu fiican ee loo qorsheeyo haynta ilmaha, haddii ay khusayso

☐ Iska ilaali inaad la saxeexato "heshiisyada" lammaanahaaga iyada oo qayb ka ah habka dhexdhexaadinta - gaar ahaan haddii heshiiska uusan dib u eegin qareenkaaga ama qolo oo la wargaliyay.

☐ Ha u sheegin xadgudbaha inaad baxayso. Dhaqso/degdeg u bax .

## MARKAA BAXDO KA DIB

☐ Tixgeli inaad dalbato amar xannibaad ah oo kaa caawin kara inaad ka fogaato xad-gudbaha adiga iyo carruurtaada. Haddii aad heshid,  hayso mar kasta.

☐ Ha ku soo laaban/noqonin gurigaaga ilaa uu booliisku kula socdo mooyaane. Weligaa ha ka hor imaan qofka xadgudubka geystay.

☐ Bar carruurta, haddii ay da'da ku habboon tahay, sida loo waco booliiska iyo inay ku sii jiraan taleefanka ilaa uu booliisku yimaado.

☐ Haddii ay da'da ku habboon tahay, ha ku dhaqmaan magacooda oo buuxa iyo cinwaankooda iyo waxa laga sheegayo rabshadaha.

